



## Ardayda dugsiyada sare ee PPS guriga ka heli karaan internet lacag la'aan ah

Iyada oo loogu talagalay ardayda dugsiyada sare, helitaanka internet-ku wuxuu door muhiim ah ka ciyaari karaa hawlo badan oo muhiim ah, oo ay ka mid yihiin shaqada guriga iyo baaritaanka iyo codsiga kulliyadaha iyo xirfadaha. Ardayda dugsiyada sare ee ka tirsan Dugsiyada Dadweynaha Portland ee internet-ka u baahan waxay guriga heli karaan internet lacag la'aan ah, iyada oo uu mahada iska leeyahay barnaamijka bilaabmay sanadkani.

Ururka Sprint 1Million Project wuxuu sameeyay qalabka hotspot oo gaaraya 700 ay helayaan ardayda dugsiyada sare ee PPS. Qalabka waxaa la socda 3 gigabayt oo ah qorshe xawaare sare leh ee LTE bishiiba. (Haddii uu isticmaalku uu ka bato 3 GB bishii, qorshaha aan cadadka lahayn ee telefoonka 'unlimited data' ayaa la helayaa oo xawaaraheedu yahay 2G inta ka hartay bisha.)

Qalabka kasta waxaa ku xiran wax kala sifeeyo 'filter' waafaqsan Xeerka Ilaalinta Carruurta ee Internet-ka. Ardaydu waxay yeelan karaan afar sano oo ah adeega internet-ka inta ay ka qayb qaadayaan dugsiyada sare. Ma jiri doonaan macluumaad shakhsi ahaan la isku aqoonsanayo oo ku saabsan ardayda ama qoysaskooda oo la ururin doono oo qayb ka ah ka qayb qaadashadooda, mana jiraan wax shuruud ah oo loo baahan yahay in la isku diiwaangeliyo wixii adeegyo ay ee ay leedahay Sprint.

Barnaamijku wuxuu qayb ka yahay [qorshaha qaranka ee Sprint](#) si hal milyan oo ah hotspots loo siiyo ardayda u baahan helitaanka internet-ka. Ardayda iyo qoysaska PPS waxay ogaan karaan in ay u qalmaan iyaga oo buuxiya foom, la helayo isaga oo ku qoran Ingiriisi iyo shan luqaddeed oo ay taageerto PPS, iyada oo laga helayo [Website-ka PPS Sprint 1Million Project](#). Macluumaadka kale, oo ay ku jiraan Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo, waxaa laga helayaa bogga internet-ka.